# Xoojinta Maamulka Dowladda Hoose ee Koonfurta Gaalkacyo: Caqabadaha iyo Fursadaha

Farxaan Isxaaq Yuusuf

Faalo kooban 46 | Juun 2026


**Soo koobid**

- Dowladda Hoose ee Koonfurta Gaalkacyo waxay wajahaysaa caqabado dhaqaale, dakhliga billaha ah oo ahaa USD 35,000–40,000 ayaa hoos ugu dhacay qiyaastii USD 18,000–20,000, taasoo ka dhalatay abaaro daba dheeraaday iyo ka faa'iideysi la'aanta ilo dakhli oo dhowr ah. Arrintani waxay xaddidaysaa awoodda dowladda hoose ee bixinta adeegyada iyo fulinta arrimaha horumarineed ee mudnaanta u leh bulshada.
- Caqabadaha joogtada ah ee adeeg bixinta, gaar ahaan biyaha roobka ee fadhiista waddooyinka iyo nalal la'aanta jidadka ayaa weli ah caqabado aan la xallin, inkastoo ay jiraan ballanqaadyo uu sameyay maamulka hadda jira intii lagu jiray ololihii doorashada.
- Daahfurnaanta iyo ka qeybgalka muwaadiniinta ayaa weli xaddidan, iyadoo wacyiga dadweynaha ee miisaaniyadda degmada, ilaha dakhliga, mudnaanta kharashaadka, iyo fursadaha ka qeybgalka go'aan-qaadashada degmada uu hooseeyo. Tani waxay muujinaysaa baahida loo qabo in la xoojiyo isdhexgalka iyo wadashaqeynta ka dhexeeysa muwaadiniinta iyo dowladda hoose.
- Inkastoo ay jiraan caqabadahaas, haddana dowladda hoose waxay kaalin muhiim ah ka qaadataa arimaha la xiriira sugidda amniga iyo ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka, iyadoo ku shaqaynaysa deegaan u nugul colaado soo noqnoqda


**Ku saabsan Somali Public Agenda**

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

**Ku saabsan qoraaga**

**Farxaan Isxaaq Yuusuf** waa Agaasime Ku-xigeenka Fulinta iyo Agaasimaha Cilmi-baarista ee SPA.

**www.somalipublicagenda.org**

**© 2026 Somali Public Agenda**

## Hordhac

Gaalkacyo, oo ka mid ah degmooyinkii Soomaaliya ka jiray ka hor 1991, waxay noqotay degmadii ugu horreysay ee gole deegaan laga dhiso Dowlad Goboleedka Galmudug sanadkii 2020. Degmadu waxay soo martay sanado colaado qabiil ku salaysan, gaar ahaan kuwa u dhexeeyay beesha Sacad ee Hawiye ee koonfurta Gaalkacyo-Galmudug iyo beesha Cumar Maxamuud ee Daarood ee waqooyiga Gaalkacyo-Puntland. Colaadihii tooska ahaa in badan oo kamid ah waa ay joogsadeen kadib heshiis nabadeed oo la gaaray 2017. Sikastaba ha ahaatee, xiisado mararka qaar soo noqnoqda ayaa weli jira, gaar ahaan kuwa u dhexeeya beelaha Sacad iyo Leelkase ee ku saabsan murannada dhulka miyiga iyo dilalka aargoosiga ah.

Dhanka Koonfurta Gaalkacyo, waxaa weli xaddidan ka-qaybgalka dadweynaha ee go'aan-qaadashada arrimaha la xiriira maamulka degmada, taasina waxa ay wiiqi kartaa kalsoonida lagu qabo maamulka degmada. Inkastoo dhismaha Golaha Deegaanka ee 2020 ay ujeeddadiisa aheyd in la dhiirrigeliyo ka-qaybgalka bulshada, haddana dad badan oo deegaanka ah waxa ay weli dareemayaan in laga reebay go'aannada la xiriira arrmaha horumarineed ee mudnaanta u leh qoondeynta kharashaadka. Dareenka ah in daahfurnaan yari jirto wuxuu kordhinayaa welwelka laga qabo isla-xisaabtan la'aanta, wuxuuna wiiqayaa lahaanshaha dadweynaha ee hannaanka maamul ee degmada. Sidaas darteed, xitaa hindisayaasha horumarineed ee leh ujeeddooyin wanaagsan waa laga shakiyaa maadaama muwaadiniinta aan si macno leh looga qeybgelin bilowga iyo kormeerka hindisayaasha horumarineed.

Iyadoo arrintaan laga duulayo, Somali Public Agenda (SPA), waxay Galkacyo-Galmudug ku qabatay kulan furan 10-kii May 2026, kaas oo la isugu keenay maamulka dowladda hoose iyo muwaadiniinta si ay uga wada hadlaan arrimaha muhiimka ah ee degmada. Kulankan wuxuu ahaa kii ugu horreeyey oo ka mid ahaa afar kulan dadweyne oo la qorsheeyay in lagu qabto Galmudug iyo Puntland (Dhuusamareeb, Koonfurta Gaalkacyo, Waqooyiga Gaalkacyo, & Qardho).

Doodahaan waxa ay ujeeddadoodu tahay xoojinta ka qeybgalka muwaadiniinta ee maamulka dowladda hoose. Madallada noocan ah waxay sidoo kale ka qeyb qaataan kor-u-qaadista wacyiga bulshada ee ku saabsan doorka iyo waajibaadka dowladaha hoose, islamarkaana waxay dhiirigeliyaan isla-xisaabtanka.

Faalladan kooban waxay diiradda saareysaa kulankii Gaalkacyo-Galmudug oo ay ka qeyb galeen 50 qof (21 haween ah, iyo 29 rag ah) oo ka kala yimid ururrada haweenka, dhalinyarada, odayaasha dhaqanka, dadka baahiyaha gaarka ah qaba, dadka laga tirada badan yahay, culimada diinta, iyo ganacsatada. Waxaa kaloo qeyb ka ahaa ku xigeenka Duqa Degmada, Maxamed Cabdi Elmi.

Kulanka ayaa socday ku dhawaad saacad iyo bar, waana la duubay. Muuqaalka waxaa laga heli karaa barta YouTube ee SPA. Kulanka ayaa intii uu socday waxay muwaadiniintu ka hadleen arrimo kala duwan oo ay ka mid yihiin uruurinta dakhliga, bixinta adeegayda, biyo-fariisiga roobka, nalalka waddooyinka, hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo xiriirka ka dhexeeya maamulka dowladda hoose iyo muwaadiniinta.

Faalladan kooban waxay soo koobaysaa arrimaha ugu muhiimsan ee looga hadlay kulanka iyo jawaabihii uu ka bixiyey ku xigeenka duqa magaalada.

## Uruurinta Dakhliga Dowladda Hoose

Dakhliga ayaa ahaa mowduucii ugu horreeyey ee su'aalo laga weeydiiyay ku xigeenka duqa magaalada, taasoo caddeyneysa xiisaha ay ka qeybgalayaashu u qabeen in ay fahmaan baaxadda dakhliga degmada iyo saameynta uu ku leeyahay bixinta adeegga dadweynaha. Sida uu sheegay ku xigeenka duqa magaalada, maamulka dowladda hoose waxa uu leeyahay 21 ilo dakhli oo suurtagal ah, inkastoo kaliya 18 ka mid ah ilahaas dakhli ay hadda shaqeeyaan.

Ilaha dakhliga ee hadda shaqeeya waxaa ka mid ah canshuurta xoolaha, canshuurta iibka maalinlaha ah, canshuurta ganacsiyada yaryar, khidmadaha gaadiidka maxalliga ah, iyo lacagaha laga qaado rarista iyo dejinta badeecadaha. Ilaha dakhliga ee aan hadda shaqeyn waxaa ka mid ah khidmadaha adeegyada biyaha iyo korontada, Khidmadaha lahaanshaha dhulka, iyo canshuuraha guryaha. Sida uu sheegay ku-xigeenka duqa magaalada, ilahan aan shaqayn waxaa laga dhalin karay dakhli muhiim ah haddii si wax-ku-ool ah loo hawlgeliyo. Wuxuu sababta ugu weyn ee aan loo uruurin khidmadaha adeegyada biyaha iyo korontada ku sheegay wada-shaqayn la'aanta ka dhex jirta shirkadaha gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada biyaha iyo korontada ee ka hawlgala magaalada.

Inkastoo ay jiraan ilo dakhli oo kala duwan, haddana, maamulka degmada wuxuu hadda soo xareeyaa kaliya USD 18,000 ilaa 20,000 bishii. Ku-xigeenka duqa magaalada ayaa sheegay in dakhliga uu si weyn hoos ugu dhacay saddexdii sano ee la soo dhaafay sababo la xiriira abaaro daba-dheeraaday oo si taban u saameeyay dhaqaalaha degmada. Markii hore, dakhliga bishiiba waxa uu gaari jiray USD 35,000 ilaa 40,000.

Hoos u dhaca dakhliga ayaa si weyn u xaddiday awoodda maamulka degmada ee daboolidda kharashaadka howlaha maamul iyo bixinta adeegyada dadweynaha. Si looga jawaabo xaaladdan, maamulka ayaa hirgeliyay tallaabooyin lagu yareynayo kharashaadka (austerity), oo ay ka mid yihiin dhimista mushaaraadka shaqaalaha iyo xaddidaadda isticmaalka gaadiidka.

Ku-xigeenka duqa magaalada ayaa sidoo kale xusay in maamulka degmada uu ku shaqeeyo miisaaniyad sanadeed, islamarkaana warbixinno maaliyadeed loo gudbiyo golaha deegaanka ee degmada si looga doodo, kadibna loo ansixiyo. Markii ay ogaadeen caqabadaha maaliyadeed ee maamulka, qaar ka mid ah ka qeybgalayaasha ayaa muujiyay u garaabis iyo faham ku aaddan jawiga adag ee shaqo, waxayna qireen xaddidaadaha ay tani ku keenayso awoodda maamulka degmada ee buuxinta filashooyinka dadweynaha.

Caqabadaha haysta Gaalkacyo ma aha kuwo gaar ah. Soomaaliya oo dhan, maamullada degmooyinka badanaa waxay la tacaalaan uruurinta dakhli ku filan oo ay ku gutaan howlahooda aasaasiga ah islamarkaana ay ku bixiyaan adeegyada daruuriga ah. Dakhliga oo kooban, maqnaanshaha maaliyadeed loosoo wareejiyo (fiscal transfers), iyo nidaamyada dakhli uruurinta ee degmada oo daciif ah ayaa sii wiiqa waxtarka maamullada degmooyinka. Somali Public Agenda ayaa si joogto ah u iftiimisay caqabadahan, waxayna ku baaqday in la sameeyo dib-u-habeyn lagu xoojinayo maalgelinta maamullada degmooyinka iyo tayeynta bixinta adeegyada dadweynaha.

### Bixinta Adeegyada iyo Daadejinta Awoodaha

Si la mid ah maamullada kale ee dowladaha hoose ee dalka, maamulka Koonfurta Gaalkacyo waxa uu bixiyaa adeegyo dadweyne oo xadidan sida waxbarashada iyo caafimaadka, kuwaas oo qeyb ahaan weli hoos yimaada wasaaradaha dowlad-goboleedka, islamarkaana ay maalgeliyaan hay'adaha horumarinta. Sikastaba ha ahaatee, ka-qeybgalayaashu waxay dalbadeen in loo caddeeyo waxyaabaha uu maamulka qabtay tan iyo markii uu xilka la wareegay sanadkii 2021.

Ku xigeenka duqa magaalada ayaa xusay dhowr guulood oo la gaaray, kuwaas oo ay ka mid yihiin dib u furista ku dhowaad 60 waddo oo horey ay u xireen qoysas deggan aaggaas. Waxa uu sidoo kale iftiimiyay horumarro laga sameeyay amniga magaalada, isaga oo sheegay in magaalada ay noqotay mid ka xasilloon sidii hore, gaar ahaan sanadihii u dambeeyay. Dhanka kale, wuxuu tilmaamay dadaallada maamulka ee ku aaddan ka hortagga iyo ka jawaabidda colaadaha beelaha ee ka dhaca degmada.

Ka-qaybgalayaashu guud ahaan waxay qireen ayaga oo bogaadinaya doorka ay dowladda hoose ka qaadato sugidda amniga magaalada. Ku xigeenka duqa magaalada ayaa adkeeyay in kharashaad aad u badan oo maxalli ah loo qoondeeyo howlaha la xiriira amniga, inkastoo amnigu yahay mas'uuliyad saaran dowlad-goboleedka.

Dhanka guulaha kaabayaasha dhaqaalaha ee maamulka, ku xigeenka duqa magaalada ayaa xusay dhismaha laba waddo oo dhererkoodu yahay 800 mitir midkiiba, kuwaas oo ay maalgelliyeen hay'adaha horumarinta, iyo sidoo kale dhowr waddo jay ah oo lagu dhisay tabarucaad maxalli ah.

Wuxuu sidoo kale soo bandhigay mashaariic la dhammaystiray, kuwaas oo ay ka mid yihiin suuq weyn ee xoolaha, dugsiyo, xarumo caafimaad, iyo xarun lagu xannaaneeyo xoolaha. Mashaariicda hadda socda waxaa ka mid ah garoonka kubadda cagta ee Cabdullahi Ciise iyo xarunta maamulka dowlada hoose ee Koonfurta Galkacyo, taas oo la sheegay in ay heer gabagabo ah marayso. Mashaariicda kale ee la filayo in dhawaan la bilaabo waxaa ka mid ah Xarunta Tababarka Professor Adow iyo maalgelin dheeraad ah oo lagu sameynayo qeybta lagu xanaaneeyo xoolaha.

Inkastoo ku xigeenka duqa magaalada uu soo bandhigay mashaariic kala duwan oo la dhammaystiray iyo kuwo socda, xog kooban ayuu ka bixiyay ilaha maalgelinta, habka fulinta, ama kharashaadka mashaariicda. Mashruuca keliya ee kharashkiisa si cad loo shaaciyay intii ay dooddu socotay wuxuu ahaa $250,000 oo lagu maalgeliyay labo waddo oo laami ah. Haddii la helo hannaan hufan oo ku saabsan maalgelinta mashaariicda iyo habka fulintooda waxa ay gacan ka geysan karaan xoojinta isla-xisaabtanka bulshada iyo kor-u-qaadista fahamka muwaadiniinta ee dadaallada horumarineed ee degmada.

Sida uu sheegay ku xigeenka duqa magaalada, waxqabadyada horumarineed ee degmada waxaa haga Qorshaha Horumarinta Degmada, waxaana mudnaanta leh wax-ka-qabashada biyo fadhiisiga roobka ee wadooyinka, dhismaha garoonka kubadda cagta ee Cabdullahi Ciise, dhammaystirka xarunta dowladda hoose, iyo horumarinta kaabayaasha waddooyinka. Isku xirka mashaariicda horumarineed iyo arimaha mudnaanta u leh maamulka degmada waa kuwa ku saleeysan baahiyaha degmada iyo tabashooyinka dadka.

### Ka-qeybgalka Muwaadiniinta ee Dowladda Hoose

Ka-qaybgalka muwaadiniinta ee go'aan-qaadashada waa tilmaam muhiim ah oo lagu cabbiro hufnaanta iyo waxtarka maamulka dowladda hoose. Intii lagu guda jiray madasha, ka-qeybgalayaashu waxay muujiyeen walaac ku saabsan fursadaha xaddidan ee ay muwaadiniintu ku heli karaan inay la falgalaan maamulka degmada, gaar ahaan iyadoo maamulka hadda jira uu xilka hayay in ka badan muddo shan sano ah.

Mid ka mid ah ka-qaybgalayaasha ayaa weydiiyay in dowladda hoose ay soo bandhigto miisaaniyaddeeda sanadlaha ah si ay muwaadiniintu uga dhiibtaan ra'yigooda ka hor inta aan loo gudbin golaha deegaanka si dib-u-eegis iyo ansixin loogu sameeyo. Su'aashani waxay ka tarjumaysay walaaca ballaaran ee ku saabsan hufnaanta iyo heerka ay muwaadiniintu uga qaybqaataan hababka go'aan-qaadashada ee degmada.

Ku xigeenka duqa magaalada ayaa sheegay in dowladdu hoose ay si joogto ah u soo bandhigto miisaaniyaddeeda sanadlaha ah muwaadiniinta, isla hoolka lagu qabtay wadahadalka Somali Public Agenda. Sikastaba ha ahaatee, ma uusan caddeyn in ra'yiga muwaadiniinta si nidaamsan loogu daro habka diyaarinta miisaaniyadda. Sidoo kale, qaar ka mid ah ka-qeybgalayaashu waxay sheegeen in aysan ka warqabin kulammada noocan ah ama aysan waligood ka qeybgelin, taas oo muujinaysa kala-fogaansho u dhexeeya dadaallada dowladda iyo fahamka dadweynaha.

Dooddu waxay iftiimisay walaac ballaaran oo la xiriira ka-qaybgalka loo dhan yahay ee maamulka dowlad-hoose. Qaar ka mid ah ka-qaybgalayaashu waxay ku andacoodeen in saraakiisha sare ee dowladda hoose ay doorbidaan kooxo gaar ah marka la dooranayo dadka lagu martiqaado aqoon-is-weydaarsiyada iyo wada-tashiyada lagu qabto iskaashi lala yeesho maamulka. Sida ay sheegeen ka-qaybgalayaashani, martiqaadyada mararka qaar si xulasho ah ayaa loo diraa, taas oo xaddidaysa metelaadda ballaaran ee bulshada.

Ku xigeenka duqa magaalada waa uu dafiray eedeymahaas, isaga oo sheegay in dowladdu hoose aysan eex u sameyn koox gaar ah isla markaana dhammaan muwaadiniinta si siman loola dhaqmo. Si kastaba ha ahaatee, walaaca laga muujiyay wada-hadalka waxa uu muujinayaa muhiimadda ay leedahay in la xaqiijiyo in hababka ka-qaybgalka dadweynaha uu noqdo mid hufan, loo dhan yahay, islamarkaana ay heli karaan dhammaan qaybaha bulshada.

Dooddu waxay muujisay in xoojinta ka-qaybgalka muwaadiniinta ay weli tahay caqabad hortaagan maamulka doowladda hoose ee Koonfur Galkacyo. Kor-u-qaadista wacyiga dadweynaha ee fursadaha wada-tashiga, iyo hubinta in ra'yiga muwaadiniinta si dhab ah loogu daro hababka go'aan-qaadashada, waxay gacan ka geysan kartaa xoojinta kalsoonida ka dhexeysa dowladda hoose iyo bulshada ay u adeegto.

### Biyo-fadhiisiga Roobka iyo Nalalka Waddooyinka

Biyo fadhiisiga roobka ee waddooyinka magaalada ayaa weli ah caqabad muddo dheer soo jirtay oo ka jirta Koonfur Galkacyo, taas oo saameysa isku socodka dadka iyo gaadiidka xilliyada roobka. Inkastoo roobku guud ahaan uusan badnayn, haddana nidaamka biyo-mareennada oo liita ayaa keena in xitaa roob yar uu carqaladeeyo isu-socodka iyo howlaha maalinlaha ah ee bulshada.

Ka-qeybgalayaashu waxay muujiyeen niyad-jab ku saabsan in arrintan aan weli xal loo helin, inkastoo ay ka mid ahayd ololihii doorashada ee maamulka hadda jira. Qaar ka mid ah ka-qeybgalayaashu waxay xuseen in wax-ka-qabashada biyo fadhiisiga roobka ay ahayd mudnaan muhiim ah oo lagu soo bandhigay ololaha, islamarkaana waxay su'aal geliyeen sababta aan weli loo arkin horumar muuqda oo la taaban karo.

Ku xigeenka duqa magaalada ayaa qiray culeyska dhibaatada iyo saameynta ay ku leedahay dadka degmada. Si kastaba ha ahaatee, wuxuu ku dooday in caqabaddani aysan ku koobnayn Gaalkacyo oo keliya, balse ay saameysay magaalooyin badan oo Soomaaliya ku yaalla. Sida uu sheegay, xal-u-helidda dhibaatadan waxay u baahan tahay dhismaha nidaam biyo-mareen oo dhammaystiran, kaasoo ka baxsan awoodda dhaqaale iyo tan farsamo ee inta badan dowladaha hoose.

Wuxuu intaa ku daray in mashaariic biyo-mareen ay hadda ka socdaan magaalada Dhuusamareeb, oo ah caasimadda Dowlad Goboleedka Galmudug, islamarkaana waxa uu soo jeediyay in tallaabooyin la mid ah lagu ballaarin karo Koonfur Galkacyo haddii mashaariicdaas ay noqdaan kuwo guuleysta.

Arrinta nalalka waddooyinka ayaa sidoo kale dhalisay walaac la mid ah. Ka-qaybgalayaashu waxay ka cawdeen xaaladda liidata ee nalalka waddooyinka ee degmada oo dhan, waxayna dalbadeen in loo caddeeyo sababta dowladdu hoose u fulin weyday hindise bulsho oo hore loo soo jeediyay. Sida ku xusan hindisahaas, qoysasku waxay rakibi lahaayeen nalal bannaanka guryahooda, halka shirkadaha korontaduna ay ku dari lahaayeen nalal dheeraad ah tiirarka korontada si loo xoojiyo nalalka waddooyinka ee ku shaqeeya tamarta qorraxda.

ku xigeenka duqa magaalada ayaa sheegay in inta badan nalalka waddooyinka ee ku shaqeeya tamarta qorraxda ay weli shaqeynayaan, islamarkaana dowladda hoose ay ka shaqeyneyso dayactirka kuwa waxyeelladu soo gaartay. Wuxuu intaa ku daray in shirkadaha korontada lagu amray in ay nalal ku rakibaan tiirarkooda korontada. Si kastaba ha ahaatee, sida la sheegay, shirkaduhu waxay codsadeen in dowladda hoose marka hore bixiso nalalka habeenkii oo dhan shaqeeya, si loogu rakibo tiirarkaas.

Sida uu sheegay ku xigeenka duqa magaalada, dowladdu hoose waxay markii dambe iibisay oo rakibtay 15 nal oo ah kuwa habeenkii ilaa subaxda shaqeeya (dusk-to-dawn) oo lagu rakibay qeyb ka mid ah degmada oo loo arkay goobo amni ahaan nugul. Isla mar ahaantaana, qoysaska ayaa lagu dhiirrigeliyay inay iibsadaan nalal la mid ah oo ay ku rakibaan bannaanka guryahooda, taas oo soo bandhigtay xal jaban oo u fudud dadka degmada iyo shirkadaha korontada.

Walaaca laga qabo biyo fadhiisiga roobka iyo nalalka waddooyinka waxa ay ka mid yihiin caqabadaha ballaaran ee heysta magaalooyinka. Inkasta oo xaddidaadda dhaqaale ee heysata dowladaha hoose ee ay tilmaan u tahay in wax badan laan laga qaban karin kaabayaasha noocan ah, dooddu sidoo kale waxay muujisay in muwaadiniintu ay filayaan horumar muuqda oo ku saabsan arrimo si toos ah u saameeya nolol-maalmeedkooda.

### Caqabadaha Horyaalla Dowladda Hoose

Ku xigeenka duqa magaalada ayaa tilmaamay dhowr caqabadood oo weli xaddidaya awoodda maamulka ee gudashada waajibaadkooda iyo ka jawaabidda baahiyaha muwaadiniinta si wax-ku-ool ah. Caqabadahaas waxaa ka mid ah culaysyka amniga, wacyiga dadweynaha oo hooseeya, iskaashi kala dhexeeya ganacsata oo daciif ah, maqnaanshaha wareejinta miisaaniyadeed ee ka timaadda dowlad-goboleedka, iyo hoos u dhac ku yimid dakhliga gudaha ee degmada.

Amniga: Ku xigeenka duqa magaalada ayaa sheegay in sugidda amniga weli uu ka mid yahay mudnaanta ugu sarreysa ee maamulka, islamarkaana loo isticmaalo qeyb muhiim ah oo ka mid ah kharashaadka maxalliga ah. Sida uu sheegay, ku dhowaad 50 boqolkiiba kharashaadka dowladda hoose ayaa loo weeciyaa howlaha la xiriira amniga, inkastoo aan miisaaniyadda sanadlaha ee degmada lagu darin qoondo gaar ah oo amniga loogu talagalay.

Wuxuu ku dooday in dowladdu hoose ay qaadatay mas'uuliyad caadi ahaan hoos timaada dowlad-goboleedka iyo dowladda federaalka. Marka lagasoo tago kharashaadka maaliyadeed, waqti iyo dadaal badan oo maamul ah ayaa sidoo kale lagu bixiyaa ka hortagga colaadaha, dhexdhexaadinta, iyo dadaallada guud ahaan amniga bulshada la xiriira.

Culayska amni ayaa ah mid aad u culus, marka la eego taariikhda Galkacyo ee colaadaha soo noqnoqda iyo deegaanka ay ku taalo degmada oo aan aheyn goob deggan. Xaaladdan ayaa ka dhigaysa maamulka dowladda hoose mid ka duwan dowladaha hoose ee kale, kuwaas oo inta badan ku shaqeeya deegaanno xasilloon, islamarkaana Maamulka Koonfurta Galkacyo waxaa saaran cadaadis dheeraad ah oo kaga imaanaya kharashaadkii oo horeyba u xaddidnaa.

Wacyiga Dadweynaha oo Xaddidan: Ku xigeenka duqa magaalada ayaa tilmaamay in wacyiga dadweynaha oo hooseeya uu yahay caqabad kale oo saameynaysa awoodda maamulka ee hirgelinta mashaariicda iyo dadaallada maxalliga ah si wax ku ool ah.

Si kastaba ha ahaatee, dooddu waxay sidoo kale iftiimisay mas'uuliyadda ay hay'adaha dowladda hoose ka saaran tahay in ay hagaajiyaan isgaarsiinta iyo wacyigelinta bulshada. Dhisidda xiriir adag oo ka dhexeeya dowladaha hoose iyo muwaadiniinta waa mid muhiim u ah xoojinta kalsoonida, dhiirrigelinta ka-qaybgalka dadweynaha, iyo adkeynta dadaallada wadajirka ah ee wax looga qabanayo caqabadaha degmada.

Ka-qeybgalka xaddidan ee ganacsatada: Ku xigeenka duqa magaaalada ayaa sidoo kale tilmaamay in iskaashi kooban ee maamulka degmada uu leeyahay ganacsatada uu caqabad ku yahay dadaallada horumarineed ee degmada. Wuxuu ku dooday in ganacsatada maxalliga ah aysan si joogto ah u taageerin hindisayaasha ay soo jeediso dowladdu hoose si loo maalgeliyo mashaariicda horumarinta ee bulshada.

Tusaale ahaan, wuxuu tixraacay soo jeedin lagu doonayay in lagu soo rogo $1 oo lagu daro biilasha biyaha iyo korontada ee bil kasta. Lacagahaas waxaa loogu talagalay in lagu taageero sanduuq horumarineed oo maxalli ah, kaasoo uu maamuli lahaa guddi horumarineed oo bulshada ah, kaas oo ka kooban 13 xubnood, islamarkaana waxaa loo jihayn lahaa mashaariicda loo aqoonsado inay yihiin mudnaanta kowaad ee dadka degmada.

Sida uu sheegay ku xigeenka duqa magaalada, inkastoo dowladdu hoose ay gacan ka geysatay kharashaadka loo qoondeeyay hindisahaas, hirgelintiisu way istaagtay sababtoo ah shirkadaha adeegyada (utility providers) ma aysan dhaqan gelin doorkoodii. Tani waxa ay muujinaysaa caqabado ku saabsan abaabulka kharashaadka maxalliga ah iyo dhisidda iskaashi wax-ku-ool ah oo ka dhexeeya dowladda hoose iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay.

Maqnaanshaha Kabka Miisaaniyadeed ee Dowlad-goboleedka: Sida magaalooyin badan oo Soomaaliya ka tirsan, Galkacyo ma hesho kab miisaaniyadeed oo ka yimaada dowlad goboleedka, inkastoo dakhliga laga soo uruuriyo degmada ay qaadaan hay'adaha dowlad-goboleedka. Ku xigeenka duqa magaalada ayaa ku dooday in xaaladdani ay culays ku tahay maamulka dowladda hoose, kuwaas oo ku qasban inay si buuxda ugu tiirsanaadaan ilaha dakhliga ee xaddidan si ay u maalgeliyaan howlaha maamulka iyo bixinta adeegyada bulshada.

Wuxuu intaa ku daray in hay'adaha dowlad-goboleedku ay Galkacyo ka uruuriyaan dakhliga, halka degmada aan si toos ah loo siin qeyb ka mid ah kharashaadkaas. Arrintani waxay ka tarjumaysaa caqabad ballaaran oo ka jirta nidaamka maaliyadeed ee heerarka dowladda ee Soomaaliya, islamarkaana waxa ay saameynaysaa adkeysiga maaliyadeed ee dowladaha hoose.

Hoos-u-dhac Ku Yimid Dakhliga Gudaha: Ku xigeenka duqa magaalada ayaa sheegay in dakhliga maxalliga ah uu hoos u dhacay ku dhowaad 50 boqolkiiba sanadihii u dambeeyay sababo la xiriira abaaro daba dheeraaday oo saameeyay gobolka. Suuqa xoolaha, oo ka mid ah ilaha dakhliga ugu muhiimsan ee degmada, ayey si gaar ah u saameysay abaartu, maadaama xaaladaha abaartu yareysay tirada xoolaha iyo dhaqdhaqaaqa suuqa.

Wuxuu intaa ku daray in maamulka uu ka dhaafay qaar ka mid ah ganacsatada xoolaha canshuuraha qaarkood, si ay u ugu muujiyaan garab istaag bulshada xoolo-dhaqatada ee ay abaartu saameysay. Inkastoo tallaabooyinkan ay siin karaan nafis muddo gaaban qoysaska nugul, haddana dhanka kale waxa ay sababayaan hoos u dhac ku yimaada dakhliga degmada xilli ay dowladaha hoose horeyba ula tacaaleysay cadaadis maaliyadeed oo culus.

## Gunaanad

Faalladan kooban waxa ay falanqeysay arrimaha ugu muhiimsan ee looga hadlay dood-wadaag ka dhacday Koonfur Galkacyo oo dhex martay muwaadiniinta iyo wakiillada dowladda hoose. Dooddu waxay iftiimisay caqabado joogto ah oo la xiriira uruurinta dakhliga, bixinta adeegyada, hufnaanta, ka-qaybgalka muwaadiniinta, iyo kaabayaasha dhaqaalaha, iyadoo sidoo kale la isla qiray doorka muhiimka ah ee dowladda hoose ay ka qaadato sugidda amniga iyo xasiloonida deegaanka.

Wadahadalku wuxuu hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leedahay abuurista fursado joogto ah oo lagu dhiirrigeliyo wada-xaajood wax-ku-ool ah oo u dhexeeya muwaadiniinta iyo maamulka degmada. Isdhexgalka noocan ah wuxuu gacan ka geysan karaa kor-u-qaadista hufnaanta, xoojinta isla xisaabtanka, kordhinta kalsoonida dadweynaha, iyo hubinta in mudnaanta horumarineed ee deegaanka ay ka tarjumaan baahiyaha iyo filashooyinka bulshada.

## Talooyin Tixgelin Mudan

Mudnaan-siinta Ka-qeybgalka Joogtada ah ee Muwaadiniinta: Dowladda hoose waa in ay qabataa kulamo iyo wada-tashiyo joogto ah oo lala yeesho muwaadiniinta, si looga wadahadlo arimaha horumarineed, waxna looga qabto tabashooyinka dadweynaha, loona xoojiyo iskaashiga ka dhexeeya muwaadiniinta iyo maamulka degmada. Ka-qeybgal joogto ah wuxuu gacan ka geysan karaa dhisidda kalsoonida bulshada.

**Kordhinta Hufnaanta iyo Helitaanka Xogta ee Dadweynaha:** Dooddu waxay muujisay in wacyiga dadweynaha ee ku saabsan dakhliga dowladda, kharashaadka, miisaaniyadaha, iyo arrimaha leh mudnaanta horumarineed uu xaddidan yahay. Sidaas darteed, dowladda hoose waa in ay baahisaa xogaha muhiimka ah ee maaliyadeed iyo kuwa maamul iyadoo adeegsanaysa habab ay dadweynuhu si fudud ku heli karaan, si loo xoojiyo isla xisaabtanka loona suurageliyo helida muwaadin xog ogaal ah.

**Xoojinta Iskaashiga Ganacsatada iyo maamulka degmada:** Xiriirka ka dhexeeya dowladda hoose iyo ganacsatada ayaa weli ah mid kooban. Maamulka waa in uu ka shaqeeyo dhisidda iskaashi xooggan oo lala yeesho ganacsatada maxalliga ah si loo uruuriyo lacag, loo taageero mashaariicda horumarinta bulshada, loona dhiirrigeliyo mas'uuliyad-wadaag ku saabsan horumarka degmada.

**Kor-u-qaadista Wacyigelinta Deegaanka iyo Dhir Beerista:** Ka-qaybgalayaashu waxay muujiyeen walaac ku saabsan wacyiga hoose ee ilaalinta deegaanka iyo jarista dhirta ku taala waddooyinka iyo meelaha dadweynaha. Dowladda hoose waa in ay fulisaa olole wacyigelin ah oo dhiirrigeliya beerista dhirta, isla markaana xoojinaya mas'uuliyadda bulshada ee ilaalinta iyo hagaajinta deegaanka.

**Somali Public Agenda**
Mogadishu Somalia
+252(0)85 8358
info@somalipublicagenda.org
<https://www.somalipublicagenda.org>

@somalipubagenda

*Warbixintan waa middii saddexaad ee lagasoo saaray afar kulan dadweyne oo taxane ah oo laga sameynayo Dhuusamareeb iyo Koonfurta Galkacyo oo katirsan Galmudug, iyo Qardho iyo Waqooyiga Galkacyo oo katirsan Puntland. Kulamadan waxaa loogu talagalay in lagu xoojiyo ka qeybgalka muwaadiniinta ee dowladaha hoose waxaana taageeray National Endowment for Democracy.*